

Asalaamu Calaykum,

Magacaygu waa Xaliima Xasan, waxaan ka shaqeeyaa Beesha Soomaaliyeed Lambeth Loona yaqaan LamSom kuna taal Stockwell/Lambeth oo xidhiidh shaqo la leh 'Stockwell Partnership'.

Maalmaha iyo Waqtiga adeegga talo bixintu waa:

Isniin – Talaada, Arbaca iyo Khamiis.

Saacadaha adeegga talo bixintu waa inta u dhaxeysa 10:00 subaxnimo ilaa iyo 4:00 galabnimo.

Aniga oo ka tirsan qaybta adeegayaasha labada luqo ku hadla kuna dooda, waxaanu siinaa adeegyo taageero iyo taloba leh qoosaska soogalaytiga ah ee haysta carruurta ka yar shan sanno iyo kuwa kaleba.

Arrimaha aanu ku caawino waxa ka mid ah, dhiirigelin ah in ay isticmaalaan kana faaiidaystaan adeegyada: Caafimaadka, Waxbarashada, Arrimaha guryaha, Talobixin ku saabsan deeqaha lacageed ee dawladu bixiso, Dhiirigelin ku saabsan siday uga qaybgeli lahaayeen fasalada lagu barto Ingriisga ee loogu talo galay dadka ku hadla afafka kale. Waxa kale oo talooyin aanu ka siinaa tababarrada, shaqada iyo waxqabashada bulshada.

Kooxda labada luqo ku hadlaa waxay diyaar kuula yihiin habkii aad uga qayb geli lahayd isku xidhka xarumaha carruurta ee Lambeth iyo sidii loogu dhiirigelin lahaa dadka soogalaytiga ah in ay si fiican u dhexgalaan bulshada.

Haddaad arrimaha kor ku xusan uga baahantay war faahfaahsan waxaad la soo xidhiidhi kartaa LamSom, Tel: 020 7738 6372. Email: lamsom@lamsom.org.uk.